Su'aalaha ku saabsan mashruucaan

Sixitaannkii ugu dambeyey: 6/13/16

1. Mashrucaan dib-u-dhiska maxaa lagu qabanayaa?

Jidka 8th Street gebi ahaantiisaba dib ayaa loo dhisayaa inta u dhexeeysa Chicago Avenue iyo Hennepin Avenue. Hawlaha laga qaban doonana waxaa ka mid ah iyadoo la wada fujin doono laamiga oo dhan iyo halka ay dadku maraanba iyo dariqyada ay galaan gawaarida dhismayaasha jidka agagaarkiisa ku yaal oo dhan, isla markaasna laga wada siibi doono nalalka gaadiidka kala haga iyo dhumaha jidka hoostiisa mara ee biyaha roobka qaada iyo dhammaan wixii kaloo ku hoos jira ama la xiriira agagaarka jidka intiisa ay shaqadu ka socoto.

2. Maxaa loo sameeynayaa mashruucaan?

Mashruucaan dib u dhiska jidka 8th Street waxaa loo sameeynayaa:

- In la wada beddelo oo dib loo dhiso laamiga iyo halka ay dadku maraan oo labadaba darxumo weyn ay ka muuqato hadda.
- In la hagaajiyo lana daryeelo ammaanka dadka lugta ku mara waddadaas loona sameeyo waxyaalo ka caawiya dhankaas sida nalka iftiimiya habeenkii, waddada agagaarkeeda oo geedo lagu abuurayo, iyo isgooysyada ay dadku ka gudbaan oo iyagana si fiican loo habeeynayo, iyo guud ahaan hawlo kale oo lagu hagaajinayo waddada.
- In la hagaajiyo xaaladda gaadiidka dadweynaha aagga jidkaani maro iyadoo la hirgelinayo dariiq halboowle u ah socdaalka gaadiidka dadweeynuhu adeegsado ee magaalada, halkaan ka fiiri: http://www.metrotransit.org/c-line-project.

3. Jidka ma waxaa laga dhigayaa mid labada dhinacba gawaaridu u kala socdaan?

Waddada 8th Street waxaa dib loogu dhisayaa mar kale isla sida ay hadda tahay oo ah jid saddex khad ah oo gaadiidku kulli u wada socdaan dhinaca bariga.

4. Jidka dhinacyadiisa iyo halka ay dadku maraan maxaa iska beddelaya?

Labada hiigsi ee ugu muhiimsan mashruucaan waxeey kala yihiin badaadinta ammaanka dadka lugta ku maraya waddada , iyo horumarinta iyo habeeynta gaadiidka ay dadweeynuhu wada adeegsadaan iyadoo loo sameeynayo meelo fiican oo ay dadku ku sugaan basaska.

Si loo gaaro labadaas hiigsi marka hore waxaa la wada ballaarin meelaha jidka dhinacyadiisa ah oo dhan ee dadku ay lugta ku maraan. Weli waxaa socda qorsheeyntii iyo sidii hawshaan loo hirgelin lahaa, hase yeeshee marka la fiiriyo isbeddellada lagu sameeynayo dhismaha jidkaan sida balaarinta halka ay dadku marayaan iyo qaabka loo sameeynayo meelaha cusub ee ay basasku istaagayaan waxaa dhici karta in la xaddadi doono adeegsiga guud ee meelaha baabuurta la dhigto ee jidka dhinacyadiisa ah.

5. Ma la yareeyn doonaa meelaha la dhigto gawaarida jidka dhinacyadiisa?

Waxaa laga fekerayaa in la joojiyo dhigashada gawaarida meelo ka mid ah waddadaan, gaar ahaan meelaha laga raacayo basaska iyo meelaha ay dadku waddada ka gooynayaan. Weli go'aan lagama gaarin arrimaha ku saabsan meelaha iyo sida loo dhigan doono gawaarida jidkaan dhinacyadiisa laakiin waxaa qorshaha ku jirta in meelo jidka dhinacyadiisa ah loo fasaxo in baabuurta la dhigto maalinta oo dhan, meelaha qaarkoodna loo fasaxo oo keliya in la dhigto saacadaha qaarkood. Meelaha qaarkood waxaa jira qorshe lagu kordhinayo goobaha la dhigan karo baabuurta iyo guud ahaan adeegsiga waddada hareeraheeda. Sida kor ku xusan hawshaan qorsheheeda weli lama soo gaba gabeyn, waxaana go'aan bilow ah laga gari doonaa marka la soo bandhigo hor-dhaca koowaad ee naqshadda lagu fulinayo shaqadaan.

6. Ma jiraa horumar hawshaan jidka laga qabanayo ay u keeni doonto dadka aan baabuurta ku socon?

Ujeeddada koowaad ee laga leeyahay mashruucaan waa in la qabto hawlo lagu daryeelayo ammaanka dadka jidka adeegsanaya ee aan baabuurta ku socon, hawlahaas oo ay ka mid yihiin in waddada lagu xiro nalal si fiican habeenkii u iftiimiya, meelaha ay dadku ku socdaan ee jidka hareerihiisa ah oo la ballaarinayo, meelaha ay dadku jidka ka gooynayaan oo masaafadooda lasoo gaabinayo si dadku ay dhaqso uga gudbaan waddada, iyo guud ahaan meelaha ay dadku ka isticmaalaan waddada oo si fiican loo habeenayo. Ballarinta waddada hareeraheeda halka ay dadku ku socdaan waxey suurta gal ka dhigeeysaa in lagu beero geedo iyo cagaar kala dhex gala dadka meesha socda iyo gawaarida jidka mareeysa.

7. Maxaa waddada 8th Street iyo is-goysyadeeda looga sameeynayaa jembiga jidka gudaha usoo gala?

Meelaha uu jembigu jidka gudaha usoo galo waxaa loogu talo galay in lagu soo
gaabiyo masaafada halka ay dadku ka goynayaan jidka si ay dhaqso uga baxaan waddada, waxaa kaloo ay suurta gelineeysaa in geedo lagu abuuro lagana taago duggaalka lagu sugo basaska.

8. Waddada 8th Street ma loo sameeynayaa dariiq uu maro baaskiilku?

Mashruucan qorshihiisa kuma jirto in waddada 8th Street loo sameeyo meel uu maro baaskiilku, intaan ka eheyn meelo lagu xirto baaskiilada, waddadaan 8th Street looma cayimin in lagu daro naqshadda guud ee magaaladu ugu talo gashay dariiqyadya lagu raaco baaskiilka. Waxaa jira waddooyin dhinac socda jidkaan oo ay ka mid yihiin 9th Street iyo 6th Street oo labaduba leh dariiq lagu raaco baaskiilka. Labada waddo ee kala ah 9th Street iyo 10th Street waxaa mustaqbilka si sugan loogu cayimay iney yeeshaan dariiq iyo agab si buuxda loogu adeegsado baaskiilka.

9. Jidweynaha bilicdiisa guud ma la hagaajinayaa?

Mashruucaan hawlaha lagu qabanayo waxaa ka mid ah in la hagaajiyo bilicda jidweynaha, hase yeeshee sida loo qabanayo iyo naqshadaha ku haboon meelaha hawlahaas laga hirgelinayo waxaa marka hore lagala tashan doonaa dadka iska leh dhismayaasha ku yaalla halka ay hawluhu ka socdaan ee jidka 8th Street.

10. Mashruucaani sidee buu u saameeyn jadwalka basaska?

Mashruucaan hawlihiisa ugu mihimsan waxaa ka mid ah in laga hir geliyo khad halboowle u ah basaska ay dadweynuhu raacaan, iyadoo ay hawshaan nagala shaqeeyneeyso shirkada magalada u qaabilsan

basaska iyo tareenka. Mashruucaan siduu u saameeynayo basaska waxaad kala socon kartaa barta Internetka ee Http://www.metrotransit.org/c-line-project.

Jadwalka basaska iyo meelaha ay ka istaagaan waddadaan hadda waxba lagama beddelayo, hase yeeshee marka shaqada dhismaha la bilaabo haddii loo baahdo in basaska laga weeciyo khadkoodii caadiga ahaa waxaa lagala tashan oo hawshaas gacan ku yeelan doona hay'adaha dawladda ee ku shaqo leh arrimaha gaadiidka dadweynaha. Wixii isbeddel ah oo lagu sameeynayo khadka basaska waxaa warkooda laga heli karaa Wakaaladda Gaadiidka ee Magaalada (Metro Transit) ka hor intaan dhismaha laga bilaabin waddaada.

11. Hadmaa la bilaabi dhismaha waddaada?

Sida la qorsheeynayo waxaa lagu talo jiraa in dhismaha jidka la bilaabo sannadka 2009, waxaana la filayaa in hawshaasi socon doonto muddo labo sano ah. Welise si kama dambeen ah looma soo bandhigin nakhsadda heerarka kala duwan ee loo hirgelin doono mashruuca dhismaha.

Shirkadaha telefoonka, biyaha iyo kuwa la midka ah waxeey qalabkooda ku sameen doonaan dayactir iyo hagaajin xilliga deyrta sannadka 2018.

12. Mashruucaan lacagta ku baxeysa halkee laga keeni? Xisaabta miyaa lagu dari qiimaha/canshuurta dhismayaasha ku yaal agagaarka mashruuca?

Mashruucaan dhaqaalaha ku baxaya meelo kala duwan buu ka imaan. Mashruuca dhaqaalaha ku baxaya in ku dhow boqolkiiba konton waxaa bixisey Dawaladda Dhexe wakaaladda uga qaabilsan deeqaha maal gelinta gaadiidka dhulka. Inta kalee soo hartayna waxaa buuxinaya lacago ka kala imaanaya khasnadda guud ee magaalada (sida deeqaha Dawladda Hoose ay ku kabto hawlaha guud iyo dakhliga ka yimaada iibka saamiyada dawladda hoose), iyo dakhliga magaalada ka soo gala maamulka iyo dayactirka agabyada lagama maarmaanka ah sida biyaha iwm, iyo canshuuraha.

Dhammaan waxyaalaha ku saabsan qiyaasta canshuuraha ee dib u dhiska waddooyinka magaalada Waxaa jira hab isku wada mid ah oo loo xisaabiyo qiyaaasta canshuuraha meelaha ay ka socdaan mashaariicda did u dhiska waddooyinka magaaladu. Qiyaastaas waxaa loo xisaabiyaa hab ku saleeysan cabbirka laba jibaaran ee "barta uu saameeyey" dhismaha mashruucu. Qiyaasta canshuuraha la xiriira mashruuca inteey tahay waxaa la ogaan doonaa kaddib marka la adeegsado qaabka xisaabinta isku wada midka ah ee caddadda canshuuraha sannadka 2019, taas oo ay goo'aankeeda gaari doonaan xildhibaannada degaanku dhammaadka sannadka 2018.

13. Sidee baan uga qayb geli kara mashruuca dib u dhiska waddada 8th Street?

Si aad uga qayb qaadato mashruucaan samee inaad tagto shirarka ku saabsan mashruucaan, la soco oo booqo meelaha la isugu yimaado internetka ee mashruucaan looga hadlayo, isu diiwaan geli hab lagaala soo xiriiro email-ka.

Waxaad ka heli kartaa warar intaas sii dhaafsan ciinwankaan: www.8thStreetProject.com

Ama -

Toos ula xiriir maamulaha mashruuca ee Minneapolis:
Steve Hay
612-673-3884
info@8thStreetProject.com